Pegasus
partners in health
kia atawhai ki te tangata



Habka Daryeelka Caafimadka ee New Zealand

Somali

Habka Daryeelka Caafimadka ee New Zealand

Wasaarada Caafimaadka (WC) waxay maamushaa oo bixisaana kharashkooda 20 Guddiyada Caadimaadka Degmo (GMDC). DHB waxay abaabulaan daryeelka caafimaad ee degmooyinkooda si ay u buuxiso heerka loo dejiyay wasarada caafimaadka.

Adeegya badan oo caafimaad oo New Zealand (NZ) waa lacag la'aan ama waa la kabaa. Si aad xaq ugu yeelato daryeelka guud ee caafimaadka waxaad u bahantahay in aad tahay muwaadin NZ ah ama aad haysatid daganaasho NZ ama qofka haysato fiisa shaqo oo labo sano ama aad ku soo gashay NZ qaxooti. Dadka aan deganayn waxaa laga yabaa in ay lacag ka baxshaan adeegyada cusbitaalada qaarkood, laakiin laguuma diidayo daryeelka caafimaadka ee deg dega haddii aanad bixin karin lacagta. NZ caafimaadkeeda waxaa looga fekeraa laba qaybood daryeelka caafimaadka ee koowaad iyo labaad. Koowaad waxaa ku jira dhakhtarka caafimaadka qoyska iyo dhakhtar takhasus leh(kana shaqeeya cusbitaalka), dhakhtarka ilkaha, farmasii haye, dhakhtarka dhaawacyada daweeya, dakhtarka cagaha daweeya, la talin iyo adeegyada la xidhiidha. Daryeelka caafimaad ee labaad waa ka laga helo gudaha nidaamka cisbitaalka- mid guud iyo mid gaara.

Haddi aad buuxisay heerka daryeelka caafimaadka oo lacag la'aana, waa ku wan waxaad ka filanayso wadanka habkiisa guud ee caafimaad.

- Lacag la'aan goobaha cisbitaalada lagu daweeyo.
- Daawayn lacag la'aana cisbitaalka dadwaynaha eel eh 24 saacadood qaybaha Shilka iyo Gar gaarka Deg dega ah.
- Lacag laga dhimay kharashka qoritaanka warqada dawada.
- Lacag la dhimay booqashooyinka dhakhtarka guud (GP). Waxaad uu bahantahay in aad iska diwaan galisid dhakhtarka sii aad uu heeshid lacag dhimis aad u wayn.
- Lacagta la dhimmay ee dhakhaatiirta ku takhasusays daryeelka sidda dhakhtarka dhaawacyada daweeya, dhakharka duugitaanka jidhka, dhakhtarka duugitaanka qalfoofka iyo kala goysyada lafah,a markuu soo gudbiyo shil dhakhtarka guud.
- Lacag la'aan ama la jabiyay qiimaha daryeelka caafimaad haddii aad qabtay cudur xaaladiisu tahay mid mudo koobana ama mid mudo dheeraada.
- Waa lacag la'aan inta badan sheeybaarada wax lagu baaro iyo raajooyinka, marka laga reebo goobaha caadimaadka sidda gaarka ah loogu hawl galo. (Si kastaba ha ahaatee, shaybaadhada wax lagu baaro iyo raajooyinka uma aha lacag la'aan shaqooyinka ama tababarka baadhitaanada caafimaad xataa haddii aad xaq u leedahay daryeelka guud ee caafimaadka oo lacag la'aana.)
- Waa lacag la'aan daryeelka caafimaadka inta dumarku uurka leeyihiin iyo dhalmadaba, Iyadoo ay adeega bixiyaan goobaha caafimaad ee gaarka loo leeyahay mooyaane.
- Ka sakow lacagta ugu horaynta la bixiyo ee la talinta, lacag ma aha haddii GP kuu gudbiyo cisbitaalka guud si laguugu soo daaweeyo.
- Lacag la dhimay ama lacag la'aan ciyaalka ka yare 6 sano booqashooyinka GP ama qoritaanka warqada dawada. Badanaaba tagista GP ama qoritaanka warqada dawada ciyaalka yaryar waxay kuu tahay lacag la'aan.
- Lacag la'aan dumarka baritaanka cudurada naasaha gala.
- Lacag la'aan dumarka baritaanka qoorta dhuunta ilma galeenka.

Heerka qiimaynta xaq u lahaanshaha waxaa laga heli karaa bogga internerka ee Wasaarada Caafimaadka riix hagaha Guide to eligibility for publicly funded health services:

http://www.health.govt.nz/

Inta badan adeegyada daryeelka kowaadka Waxaad uu bahantahay lacag in aad bixiso.
Si kastaba ha ahaate la tashiga dakhtarkaaga ama kalkaaliye caafimaad waa la kabaa, hadii aad tahay bukaan jiif diiwaangashan. Guud ahaan waxaad fili lahayd in aad keliya bixiso 50% oo ah wadarta guud ee qiimaha la talinta. Adeegyada caafimaadka iyo qoritaanka dawada waa u lacag la'aan dhamaan caruurta diiwaan gashan ee ka yar da'da lix sano.

Daweeynta cusbitaalada guud ee NZ waa lacag la'aan. Hadii aad xaq u leedahay. Si la guugu ogolaado cusbitaalka guud, waa in uu ku soo gudbiyaa dhakhtar takhasus lihi. Dhakhtarka qoyska (oo loo yaqaano dhakhtarka guud ama GP) wuxuu kuu soo gudbin karaa cusbitaal, haddii ay xaaladaadu deg deg tahay. Iyadoo xanuunka laguugu ogolaaday xanuun kooban oo daran mooyee, amase aad shil gashay.Waxaad dooran kartaa in baahiyahaaga caafimaadka ay bixiyaan cusbitaal gaar ahi. Si kastaba ha ahaate adeegyada oo dhan waa in lacag laga bixiyaa. Caymiska caafimaad caawimo wayn bay kuu noqon karaan adiga si aad u hesho adeegyada cusbitaalada gaarka ah.

Hooyooyinka qaarkood , aan xaqa u lahayn caafimaadka dadka ee la maal geliyo iyo adeegyada naafada ee xaqooda leh, weli waxay xaq u yeelan karaan daryeelka hooyanimada ee kharashka laga bixiyo haddii lamaanahoodu uu xaq u leeyahay. Waxii xog dheeraada ah, eeg heerka qiyaasta xaq u lahaanshaha ee bogga internetka (MoH).

http://www.health.govt.nz

Guide to eligibility for publicly funded health services

Dhamaan caruurta ka yar 6 sano iyadoon loo tix gelin muwaadinimadooda ama heerkooda soo geleetinimo, waxay xaq u leeyihiin talaaka kharshaka dadka laga bixiyo ee Jadwalka Talaalka iyo adeegyada Ilmaha Wanaagsan.

Dowladu si xoog leh waxaay ugula talinaysaa NZ gudaheeda dadka kuu nool kuwaas oo aan xaq u lahayn adeegyada caafimaad ee kharashkooda dadka laga bixiyo inay haystaan caymis safar oo buuxa, oo ay ku jirto caymis caafimaad.

Doorashada dhakhtarka qoyska (GP)

Dhakhtarka qoysku (GP) waa qayb ka mid ah kooxda caafimaadka ee koowaad kuwaas oo ah cidda koowaad ee lagala soo xidhiidhayo nidaamka caafimaadka NZ. Kooxdan caadi ahaan waxa ku jira dhakhtarkaaga (GP) kalkaaliyayaal iyo farmashiilayaal. Waa wax aad u muhiima in aad iska diwaan galisid (GP) sidda ugu dhaqso badan ee aad karto markaad timaado gurigaaga cusub ama magaladaada. Inta badan (GP) waxay ka hawl galaan dhexda xarun caafimaad.

Waxaad siddoo kale raadin kartaa diiwaanka bogga internetka Golaha Caadimaadka. Waxaad heli kartaa goob caafimaad adoo baadhaya qaybta hore ee Boggaga Cad ee buuga telefoonada hoosta "Registered Medical Practioners and Medical Centres" ama bogga internetka ee. http://www.linkage.co.nz/webhealth dooro goob caafimaadka oo u dhaw gurigaaga ama goobta shaqadaada midkii aad kugu haboonaada. Goobaha caafimaadka, waxaa ka shaqeeya dhakhaatiir

iyo kalkaaliyayaal iyo shaqaale maamul. Qaar kale waxay leeyihiin famashiilayaal iyo shaqaale adeeg bulsho iyo caafimaad. Dhamaan waxay ku leeyihiin door muhiima daryeelkaaga caafimaad.

Maxaa dhacaya markaan, iska diiwaan galiyo dhakhtarka?

Haddii aanad iska diiwaan gelin (GP), waxaa lagaa qadayaa lacag badan oo kharashka la talinta ah. Iska diiwaan gelinta dhakhtar (GP) jooga goob caafimaad waa lacag la'aan waana wax fudud in la sameeyo. Si kastaba ha ahaatee, diiwaan galinta ma aha in aad is qortid. Waxaad iska qori kartaa oo keliya (GP), haddii aad xaq u leedahay in aad siddaas samayso. Adiga ayeey kugu xirantahay haddii aad iska diiwaan geliso ama iska ka qorto dhakhtar lab ah ama dhedig ah. Adeegaha dhakhtarku waxuu ku siinayaa warqad la buuxinayo oo leh magacaaga iyo faahfaahinta cinwaanka lagaala xidhiidhayo-xasuusnow in aad keentid baasaboorkaga iyo fiisahaaga. Waxaa siddoo kale lagu weydiin doonaa taariikhdaada caafimaad. Inkastoo aad xaq u leedahay.in aad bedesho GP gaaga, waa in la ogaadaa in lacagta kabitaanka goobta caafimaad ee cusub aan la heli doonin ilaa sadex bilood. Siddaas awgeed waa in aad bixisaa iyadoo buuxda, kharash aan la kabin ah. Kabitaan aad u farabadan waxa heli kara bukaan jiifka diiwaan gashan. Markaad buuxiso foomka diiwaan gelinta ee goobta caafimaad ee aad dooratay, waxaad xaq u leedahay kabitaanadaa.

Waa fikir fiican in la iska qoro goob caafimaad oo aad ku yeelan karto xoog, xidhiidh sii jira oo aad la yeelato kooxdaada koowaad ee daryeelka.

Siddeen uu sameeystaa ballan aan ku arko dhakhtarka?

Haddii aad rabto in aad aragtid dhakhtarkaaga, waxaa talo fiican ah in aad ballansato maalin ka hor. Si kastaba ha ahaate, dkakhtarka GP had iyo jeer waxa uu ku arki doonaa isla maalintaa, haddii arintaada caafimaad ay tahay deg deg. Waxaa siddoo kale ku soo raaci kara saaxiib ama qof kuu caawiya dhamaan baadhitaanada caafimaad haddii aad jeclaan lahayd. Qofka ku caawinaya looma adeegsan karo turjubaan ahaan. Adeegan waa in uu had iyo jeer fuliyaa xirfad yaqaan tababarani. Tan waxaan ka hadli doonaa wakhti ka dib.

Kalkaaliyayaasha caafimaad waa il fiican oo xogta caafimaad ah waxayna fuliyaan adeegyo badan. Waxaad waydiisan kartaa in aad samaysato ballan aad ku aragto kalkaaliye.

Lacag bixin ayaa loo baahanyahay booqasho kasta qiimahuna waa kala duwan yahay goob kastoo caafimaad. Kharash kale oo dheeraada baa jira haddii uu dhakhtarku guriga kugu soo booqdo ama ballan deg deg ah. Marka la booqanayo dhakhtar, qoritaanka warqad dawo waxaa la bixin doonaa oo keliya haddii loo baahdo tana waa feejignaanta dhakhtarka. Jirooyinka oo dhan ma keeno caabuqu. Caabuqa ku dhaco xubnaha neefsashada waa kuwa fayras leh; antibooyatigu ma daawayn doono. Dhakhtarkaagu hadduu kuu qoro antibiyootiga, aad bay muhiim u tahay in aad qaadato dhamaan dawooyinka. Antibiyootiga iyo dawooyinka loo adeegsado ololka jidhku isku mid maaha.

Siddeen uu helaa in aan arko dakhtar takhasus leh?

GP ayaa kuu gudbinaaya dhakhtar takhasuska leh si uu kuu sii baaro. Kharashka booqashada dhakhtarka takhasuska lihi wuu kala duwan yahay guud ahaana waxuu ka bilaabmayaa $150.00 la talinta ugu horaysa. Haddii aad adigu iska bixiso lacagta booqashada, ama ay kaa bixiyaan caymiskaaga, waxaad heli doontaa adeeg deg degoo macquul ah.

Haddii aad xaq u leedahay, waxaa laguu gudbin karaa dkahakhtar takhasus leh oo joogo nidaamka caafimaadka guud taasi waa lacag la'aan, laakiin waxaa lagu gelin doonaa liiska sugitaankadhowr bilood intaanad helin ballan ka hor.

Siddee buu u shaqeeyaa Caymiska Caafimaadka Gaarka ahi?

Dadka qaarkood NZ waxay doortaan in ay iska bixiyaan caymiska caafimaadka gaar ka ah. In kastoo ay qaali noqon karto, yeelashada caymis caafimaad oo gaara micnaheedu waa in aad ka heli karto daawayn daryeel dhakhtar takhasus leh cisbitaal gaar ah iyadoon lagugu darin liiska sugitaanka.

Si aad ku heshid caymiye caafimaad oo gaar ah eeg hoosta Caymiska – Daawaynta gudaha Christchurch gudaha bogga www.yellow.co.nz

Waxaa jira qaar takhasus u leh caymiska oo ku hadla afaf kale oo aan Ingiriisiga ahayn. Waxay isku xayaysiiyaan saxaafada dadka laga tirada badanyahay.

Waxaa ku jira xog dheeraada oo ku saabsan caymiska caafimaadka kaaso aad ka heli kartid bogga "Everybody" website.

http://www.everybody.co.nz/page-56d7ef0e-9e87-46ad-9ab9-843e76f8301e.aspx

Kaadhka Adeegyada Bulshada (CSC)

Kaadhka Adeegyada Bulshada waxa soo saara Waaxda Dowladda ee loo yaqaan "Shaqo iyo Dakhli". Waxaad codsan kartaa Kaadhka Adeegyada Bulshada haddii aad tahay:

- 18 jir ama ka wayn (ama 16-17 jir oo dhigta waxbarasho buuxda oo ka saraysa dugsiga sare).
- Dhakhli hoose ama dakhli dhexe (tirada waxay ku xidhantahay xaalada qoyskaaga).
- Oo ah wadani New Zealand ah ama haysta daganaasho.

Kaadhkan waxa uu kaa caawin karaa adeegyada soo socda qiimo la dhimay ama lacag la'aana:

- Kharaashka booqashooyinka dhakhaatiirta saacadaha aan caadiga ahayn shaqeeya.
- Booqashada dhakhtarka aan ahayn dhakhtarkaaga caadiga ah.
- Muraayadaha caruurta da' doodu tahay 15 jir iyo ka yar.
- Daryeelka deg dega ah ee ilkaha oo ay bixiyaan cusbitaalada oo ay ogolaadeen qandaraaslayaasha ilkahu.
- Safarka iyo hoyga daweed cusbitaalada guud ee ka baxsan xaafadaada marka laguu soo gudbiyaya caawimo guri.
- Qorida warqada dawada qarashkeeda (marka qorida dawadu ay ka timaado adeeg bixiye aan lahayn qandaraas Wasaaradeed, DHB ama PHO, tusaale, dhakharka takhasuska leh ee goob gaara).

  Si aad u hesho xog dheeraada oo ku saabsan kaaraka waxaad aada:

  http://www.work&income.govt.nz/individuals/a-z-benefits/community-services-card.html

Siaad u hesho in aad xaq u leedahay kaar waxaad la xiriirtaa Work and Income. hayadaha dowladaee maamusha, toos baa looga heli karaa internetka www.workandincome.govt.nz ama alcag la'aan ku soo wac 0800 999 999.

Maxuu yahay Isticmalka sare ee kaarka cafimaadka?

Dadka la kulma dhakhtarka GP 12 goor ama ka badan muddo 12 bilooda xanuun socda ayaa xaq u yeelan doona Isticmaalka Sare ee Kaadhka Caafimaadka taas macnaheedu waxa weeye kabitaan aad u sareeya ayay ka helayaan booqashooyinka Dhakhtarkooda GP iyo qoriaanka daawooyinka.

Maxaa dhacaya haddaan shil galo?

Haddi aad tahay muwaadin New Zealand ah nz ama aad degentahay ama haysatid fiisa ku meel gaadha, oo shil kugu dhacay oo shaqada lagugu dhaawacay ama guriga, Shirkadda Dawlada ee Magdhowga shilka (ACC) Waxay si suura gala u bixin doontaa kharashka dhaawaca shakhsiyeed. Daboolidaa kharashka ee ACC xaq kuuma siinayso daryeel caafimaad oo lacag la'aana. Weli waxaad iska bixinaysaa kharashka daawaynta dhaawacii kaa soo gaadha guriga ama shaqada. Qaar heerka qiyaasta xaq u lahaanshaha ayaa ku haboon. ACC ma bixiso kharashka dawada, walbahaarka ama arimaha dareenka, dhaawacyada la xidhiidha gabowga iyo dhaawacyada si tartiib tartiib ah u yimaada. Wixii xog dheeraada ee ku saabsan daboolida kharashka dhaawaca shakhsiyeed ee ACC telefoon lacag la'aana u soo dir 0800101996 ama booqo www.acc.co.nz

Waa in la ogadaa in ay ACC ay daboosho kharashka kuli waxii shil ah ee ka dhaca NZ dhib malaha heerka sharciga soo geleetinimo. Tarjubaanada waxaa laga heli karaa Khadka telefoonka ee Luqadda.

Daryeelka Caafimaad Saacadaha shaqada ee aan Caadiga ahayn.

Haddii aad u baahato daawayn deg dega oo ka baxsan saacadaha shaqada ee caadiga ah ee dhakhtarkaaga (8.00 g.hore- 6.00 g.dambe Isniin- Jimce), la xidhiidh ugu horayn GP gaaga. Wac goobta caafimaad halkaas oo aad ka maqli doonto fariin ku saabsan waxa aad yeeli doonto. Haddii aanay jirn in GP gaagu ka jawaabo telefoonka, waxaa loo xawiliyaa kalkaaliso takhasus leh oo kugula talin doonta waxa aad samayn doonto.

Khadka Telefoonka caafimaadka waa adeeg telefoon oo aad waci karto wakhti kasta 24 saacadood. Soo wac telefoon lacag La'aana 0800 611 611 talo lacag la'aana oo ay bixinayaan kalkaaliyayaal caafimaad oo diiwaan gashan. Haddii aad rabto in aad la hadasho qof aad isku luqad tihiin, fadlan waydii maxaa yeelay Khadka Telefoonka caafimaadka siddoo kale waxa uu bixiyaa adeegyo turjubaanimo.

Haddi aad rabto qof ahaan in aad la hadasho dhakhtar GP saacadaha ka dambeeya xiliga shaqada caadiga ahi ay dhamaato waxaad aadi kartaa goob caafimaad oo 24 sacadood shaqaysa. Kharashbaa jira uu buxinayo bukaan jiifku adeegan. Wakhtiga sugitaankuna aad buu uga yar yahay ta cusbitaalada guud.
Daryeelka deg dega ah waxaa laga heli karaa cusbitaalka guud ee dadwaynaha "Waaxdiisa Deg dega ah(ED)" 24 kii saacoodoodba. Kharash lama bixinayo adeegan ballana looma

baahna. Wakhtiyada qaar waxaad sugaysaa wakhti dheer si laguu arko. Haddaad shil gashay ama aad qabto cudur halis ah waa in aad tagtaa ED.

Siddee buu u shaqeeyaa gaadhiga Gar gaarka deg dega ahi?

St John's ayaa siiya adeegyada gawaadhida gar gaarka deg dega ah dhamaan dadka reer New Zealand.

Si aad u wacdo gaadhiga gar gaarka xaalada deg dega ah wac 111.

In kastoo gawaadhida gar gaarka deg dega ah loo arko lacag la'aan, qaan sheeg ayaa laguu soo diri doonaa hadddii gaadhiga gar gaarka deg dega ah aad u isticmaasho adeeg aan la xidhiidhin shil. Iyadoo St. John's ay tahay urur samafal, qaan sheegtu waa tirada ugu yar ee $80 waana in loo arkaa siddii tabaruc oo kale.

Saraakiisha gawaadhida gar gaarka deg dega ahi waxay qabaan tababar ay ku dejiyaan dadka shilka galay ama bukooday. Siddoo kale waxay:

- Qaadaan bukaan jiifka cusbitaalka la dhigayo iyo daawaynta bukaan socodka.
- U kala qaadaan bukaan jiifka cusbitaalada ama cusbitaal ilaa guriga.
- Waxay la shaqeeyaan booliska iyo gaadiidka dab damiska xaladaha deg deg ah iyagoo bixinaaya daryeel caafimaad.
- Qaban qaabiyaan oo shaqaale raaciyaan diyaaradaha qumaatiga u kaca duulimaadyada iyo isku xidhka.
- Ka war hayaan digniinaha caafimaad ee shakhsiyeed.

Siddeen u helaa Daryeelka Caafimaadka Ilkaha?

Daryeelka lama huraanka ah ee ilkaha caruurta xaqa u leh waa u lacag la'aan ilaa dhalashadiisa/teeda 18^{aad} . Intaa ka dib waa in aad bixiso lacagta daryeelka ilkaha. Dadka badankoodu way is diiwaan geliyaan oo bixiyaan adeegyada gaarka ah ee daryeelka caafimaadka.

Dhakhtarka ilkaha sidda GP waxay awoodaan in ay qoraan daawo haddii loogu baahdo siddii qayb daawayntaada ah. Warqadahan dawo qorida waxaa laga buuxsan karaa farmasiiga xaafada.

Dhakhtarada ilkahu guud ahaan kama helaan lacag kabitaanta dowlada kharashkooduna waa kala duwan yahay. Caadi ahaan waxay ka qaadaan kharash ka badan dhakhtarka caadiga ah ee GP.

Waxaad ka heli kartaa qoraalka macagyadooda Boggaga Jaalaha ah ee internetka ama waxaad ka raadin kartaa midka xaafadaada bogga internetka ee Golaha Ilkaha ee New Zealand. Si aad u hesho qaliinka ilkaha xaafadaada ka eeg bogga:

http://www.dentalcouncil.org.nz

Siddeen u helaa adeegyada farmasiiyada?

Haddii xaaladaada caafimaad ay u baahantahay ku dawaynta dawo, dhakhtaradu waxay kuu qori karaan warqadii dawada (New Zealand gudaheeda, dawooyinka qoran lama iibsan karo iyadoon la siddan warqada qoritaanka dawada). Waxaad u bahan doontaa in aadu qaadato farmasiiga warqada dawada la qoray. Markaad warqada dawada la qoray u dhiibto xubin shaqaale ah, waxaa laguu sheegi doonaa ilaa inta dawada qoran lagu diyaarin doono. (Yadoo ay ku xirantahay sidda uu mashquul u yahay farmasiiluhu ,waxay qaadan kartaa ilaa labaatan daqiiqo.) Ka hor inta aanad helin dawadaada, farmasiilaha - ama xubin shaqaale ahi - waxa uu dalban doonaa in uu hubiyo magacaaga iyo cinwaankaaga. Tan waxa lagu hubsanyaa in qofkii saxda ahaa uu helayo dawada. Waxa kaloo kuu soo qaadi kara dawada laguu qoray qof ka tirsan qoyskaaga. Kharash $5.00 shay kasta oo dawada laguu qoray ah ayaa laga bixin doonaa cidda xaqa u leh. Dhamaan dawada la qoro Dowladaa si buuxda u bixisa lacagta, laakiin qaar baa leh kharash bukaan jiifka ah oo badan. Kharashkani waxaa uu dheeraad ka noqon doonaa $5.00 wakhti kastoo aad u timaado in dawo laguu qoro. Qaar kood dhakhaatiirta taqasuska leh warqada dawada eey ku qoraan waxaa laga yabaa in ay lacagtoodo badan tahay. Ku celinta dawo markii hore laguu qoray waxaa laga soo qaadan karaa isla farmasii ka hor intaanay taariikhda ku qorani dhicin- taas oo caadi ahaan ah sadex bilood. Haddii aadan awoodin in aad u soo laabato ku celinta oo ay sabab u tahay safar ama arimo socodka ah, waxaad waydiisan kartaa dhamaan daawooyinkaaga in lagu wada siiyo hal mar.

Fadlan hubi in marka aad soo qaadato dawada laguu qoray , in aad si buuxda u fahanto sidda loo qaadanayo. Haddii uu shaki kaaga jiro, waydii shaqaalaha farmasiigu in ay kuu sharaxaan. Haddii walaac dheeraadi kaa haysto dawadaada, kooxdaada daryeelka dawada ee muhiim ka ahi waxay soo habayn karaan booqasho lacag la'aana oo guriga ah oo ka socda Adeega Maamulka Dawada. Adeegan kolba meel u baxaa waxaa ka shaqeeya shaqaale farmasii kuwaas oo awood u leh in ay waaniyaan oo ay barraan habka dawooyinkaaga loo qaadanayo. Turjubaanada siddoo kale waa la heli karaa.

Wixii xog ah ee ku saabsan farmasiiyada New Zealand booqo boggaga soo socda:

http://www.pharmac.govt.nz/charges

http://www.pharmac.govt.nz/patients

Haddii adiga ama qoyskaagu ay u baahdaan daawooyin la qoray oo badan. Waxaad xaq u yeelan kartaa Kaadhka Kabida Farmasiiyada. Waxaad ka heli kartaa kaadhkan farmasiiyada xaafadaada.

Farmasiiyadu waxay iibiyaan oo kale waxyaabo fara badan oo alaabta miiska dushiisa ah (OTC), oo aad iibsan karto adigoon siddan warqad qoritaan. Alaabooyinkan oo loo adeegsan karo xaalado caafimaad oo aad u badan, sidda ka xasaasiyada ama madax xanuun ama kiriimyo jidhka guud kooda la mariyo ama kiriimka la is mariyo. Waydii shaqaalahaaga farmasiiga talo.

Farmashiyaha dadka ka shaqeeyaa waxay ku siin karaan talo haddaad wax walaaca qabto oo ku saabsan caafimaadkaaga ama ka qoyska.

Haddii aad deg deg ugu baahato daawo sacadaha aan wax la iibsan, waxaad aadi kartaa Farmasiiga xaalada Deg deg ah. Kuwaan waxeey furan yihiin 10.00 habeenimo ama 11.00 habeenimo. Waxaad ka heli karta oo ay ku qoran yihiin qaybta uu horeysa ee buuga telefoonada bogga cad Farmashiyaasha Deg dega gudaha "Cusbitaalada & adeeg bixiyayaasha kale ee caafimaad".

Siddeen u helaa turjubaan?

Haddii aad u baahantahay turjubaan si aad ugu fahantid GP afkaaga, waxaad xaq sharci ah u leedahay in aad mid hesho. Adeegani waa u lacag la'aan dhamaan bukaan jiifka diiwaan gashan. Dalbo turjumaan markaad ballan samaysato- ugu yaraan 24 saacadood horteed. Ha u adeegsan ciyaalka ama xubin qoyska ah siddii turjubaan. Ma aha dad xirfad caafimaad leh si fudud baanay khalad uga samayn karaan talooyinka iyo tilmaamha GP gaaga.

Siddee baan cabsho uga soo gudbiyaa ku saabsan daryeelkayga caafimaadka?

Qofkasta oo isticmaala caafimaadka ama adeega dadka naafada ah waxaa ilaalinaya sumada xuquuqaha. Sarkaal gudi ay dooratay oo madax banana ayaa kor u qaada oo ku ilaaliya hoosta sharciga New Zealand. Xuquuqahaa waxa la heli karaa iyagoo ku qoran afkaaga boggan:

http://www.hdc.org.nz/

Ma heli karaa talo lacag la'aana oo caafimaad iyo xog dheeraada?

Ka dib booqashada GP gaaga, dhakhtarka ilkaha ama dhakhtar takhasus leh, waxaa lagu siin karaa kaadh uu ku qoran yahay magaca xaaladaada iyo cinwaanka shabakadu. Tag cinwaankan, ku qor magaca xaaladaada waxayna ku gayn doontaa bogga si cad u sharaxaaya xaaladaada. Boggag badan baa loo turjumayaa afkaaga.

http://www.healthinfo.org.nz/

Talooyinka caafimaad ee lacag la'aana adeegyada caafimaadka ee xaafadaada waxaad soo waci kartaa Khadka caafimaadka oo lacag la'aana 0800 611 116.

Xogta caafimaad iyo xog kale oo ku saabsan qaybo badan oo nolosha New Zealand ah waxaa siddoo kale laga heli karaa bogga internetka Christchurch Migrants Centre, oo ku taal 166 St Asph St, Christchurch.

http://www.migranthub.org.nz/

Waxaad kaloo heli kartaa xogta xaaladaha caafimaadka ku saabsan oo ku qoran luqaddo kale:

http://www.healthed.govt.nz

©Pegasus Health (Charitable) Ltd, PO Box 741, Christchurch – SO001

Printed 1st May 2014